



# Dib u Milicsiga Maalinta César Chávez

Maarso 31, 2021

Sanadkii 2014, Madaxweyne Barack Obama wuxuu ku dhawaaqay in loo aqoonsado Maarso 31keeda Maalinta César Chávez. Maanta waxa aynu u dabaaldegeynaa inaga oo sharfayna noloshii iyo shaqadii iyada oo dad fara badan u tixgaliyeen inuu ahaa geesi Migsikaan Maraykan ah oo u dagaalami jiray xuquuqda shaqaalaha beeralayda ah iyo bulshooyinka u soo haajiray wadanka. Taariikhdiisu waxay noqotay xitaa wakhtigani aynu jirno ee xanuunkan faafayaa mid ku haboon. Siyaabaha faraha badan ee aan ugu tiirsanahay shaqaalaha beeruhu wuxuu caddeyn sanadkani ayaa caddeyn u ah. Shaki la'aan, waxa ay yihiin lafdhabarka bulshadeena taasi oo la'aantood iyo shaqadooda la'aanteed waxa aynu noqon lahayn kuwa luma.

César Chávez' wuxuu saameyn ku yeeshay bulshadeen taasi oo ah mid aan la diidi karin. Sanadkii 2010, ka dib markii bulshadeenu ka hawlgashay iyaga oo u doodaya ayaa Dugsiyada Dadweynaha Portland dib ugu magaacaabeen mid ka mid ah iskuuladooda sidii ay ugu sharfi lahaayeen. Dugsiga César Chávez wuxuu ka kooban yahay bulsho qoys ahaan dhaqan iyo bulsho kala gedisan oo dhaqanka ay ka soo jeedaan laga dareemayo arday kasta oo ka mid ah ardayda wax ka barta iskuulkani. Waxaan dareemayaa sida weyn ee aan ugu hanweynahay mid kasta oo idinka mid ah, iyo arday kasta oo Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyada oo aan u sii marsiinayo kanaalada César Chávez' "*¡Sí se puede!*" (*Haa, waanu karnaa!*) awooda aan ku hoggaamineyn isbedelka iyo horumarinta adduunyada.

Waxa aan ku soo xiri doonaa inaan soo qaato dhowr erey oo uu lahaa César Chávez: "Marka bulshadu bilowdo isbedelka, dib looma celin karo. Jaahil kama dhigi karta qof bartay sida wax loo akhriyo. Ma gumeyn kartid qof qab weyn. Ma cabudhin kartin dadka aan mar dambe baqeyn. Waanu aragnay mustaqbalka, mustaqbalkuna anaka ayuu la jiraa." Sidaa waxaa yiri - César Chávez

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada